



: somalisk  
Informasjon om Dublin-regelverket



# WAA MIDKEE DALKA KA BAARAANDEGI DOONA CODSIGAAGA MAGANGALYADA?

WARBIXIN KU SAABSAN XEERKA DUBLIN

## IBUUGGAN WARBIXINEED WAXAAD KA HELI DOONTAA JAWAABAHA KU TOOSAN SU'AALAHA SOO SOCDA:

- Waa maxay Xeerka Dublin?
- Waa midkee dalka ka baaraandegi doona codsigaaga magangalyada?
- Maxaa dhacaya haddii codsigaaga magangalyadu uu soo hoos galo Xeerka Dublin?
- Waa maxay ujeeddada Xeerka Dublin?

### 1. XEERKA DUBLIN

- **Xeerka Dublin** waa heshiis ay caasimadda dalka Ireland, Dublin, ku saxiixeen dhowr waddan oo Yurub ku yaalla.
- Dadku dhammaantood xaq uma leh in codsigooda magangalyada lagaga baaraandego dalka Norway. Marka aad magangalyo codsato, masuuliyiinta Norway ayaa horta baara haddii aad buuxinayso shuruudaha suurto gelinaya in kiiskaaga lagaga baaraandego dalka Norway. Waxaa taas ka iman kara laba natiijo: codsigaaga magangalyada waxaa lagaga baaraandegi doonaa dalka Norway, ama waxaa lagu wareejin doonaa dal kale oo Yurub ku yaalla, kaasoo masuul ka noqon doona codsigaaga magangalyada.
- In codsigaaga lagaga baaraandegayo dalka Norway ama in lagu wareejinayo dal kale waxay ku xiran tahay dhowr arrimood.
- Haddii codsigaaga magangalyada lagaga baaraandegi doono dal kale oo Yurub ku yaalla masuuliyiinta dalka Norway iyagu ma baari doonaan sababaha aad magangalyada u doonayso, waxay ka fiirsan doonaan uun dalka kale ee Yurub ku yaalla ee ay tahay in uu ka baaraandego codsigaaga magangalyada.

### 2. WAA MIDKEE DALKA KA BAARAANDEGAYA CODSIGAAGA MAGANGALYADA?

#### **Codsigaaga waxaa lagaga baaraandegayaa dal kale haddii aad:**

- Magangalyo ka codsatay dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin ka hor intii aadan iman dalka Norway.
- Dalkugal ama oggolaasho deganaansho ka heshay dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin.
- Leedahay xubno qoys oo kuu dhow oo jooga dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin.
- Si sharci darro ah ugu safartay dal soo hoos gala Xeerka Dublin kaasoo aan ahayn dalka Norway (oo halkaas faro lagaaga qaaday).

- Si sharci darro ah u joogtay mid ama dhowr dal oo soo hoos gala Xeerka Dublin ugu yaraan shan bilood

Haddii aad 18 jir ka yar tahay oo aanay waalid ama dad kale oo ay mas'uuliyad waalidnimo kaa saaran tahay kuu joogin dalka Norway , codsigaaga magangalyada waxaa lagaga baaraandegi doonaa keliya haddii aad magangalyo ka codsatay dalka kale ama haddii aad halkaas ku leedahay waalid ama dad kale oo ay mas'uuliyaddaada waalidnimo saaran tahay.

### **Sidee ayay mas'uuliyiinta dalka Norway ku ogaanayaan in codsigaaga lagaga baaraandegi doono dal kale?**

Habka ugu badnaan la adeegsado waa iyadoo faraha dadka laga baaro nidaamka Eurodac. Nidaamka Eurodac waa kayd macluumaad oo ay ku jiraan faraha laga qaado dhammaan dadka 14 jir ka weyn ee iyagu magangalyo codsaday ama si sharci darro ah u galay mid ka mid ah dalalka soo hoos gala Xeerka Dublin.

### **Si kasta oo ay tahayba waxaa haddana dhici karta in codsigaaga lagaga baaraandego dalka Norway haddii:**

- Aad haysato Dalkugal aad ka heshay dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin kaas oo dhacay muddo ka badan lix bilood ka hor.
- Oggolaasho joogitaan oo aad ka heshay dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin ay dhacday muddo ka badan laba sanadood ka hor.
- Aad ka maqnayd dalalka soo hoos gala Xeerka Dublin muddo ka badan saddex bilood ka hor intii aadan magangalyo ka codsan dalka Norway. Waa in aad taas adigu caddayso, shuruudaha ku xiranna way adag yihiin. Waxaa badi caddayn ahaan loo aqbalaa uun tigidhada safarka iyo shaabbad ku taalla baasaboorkaaga oo caddaynaysa in aad ka gudubtay xudduudaha. Si kasta oo ay tahayba Hay'adda Agaasinka Ajnebigu (UDI) way tixgelisaa dukumeentiyada kale.
- Mas'uuliyiinta dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin ay kugu celiyeen dalkaagii hooyo.
- Aad xiriir adag ku leedahay dalka Norway:
  - Waxaa dalka Norway kuu jooga qoys kuu dhow (nin ama xaas, carruur ka yar 18 jir ama waalidkaaga haddii aadan qaangaar ahayn). Waxaa muhiim ah in booliiska Norway aad u sheegto qaraabada aad ku leedahay dalka Norway.
  - Waxaad dalka Norway hore ugu lahayd oggolaasho shaqo- ama oggolaasho degganaansho muddo sanad ka badan.
- Mas'uuliyiinta dalka Norway ay aaminsan yihiin in ay habboon tahay in kiiskaaga lagaga baaraandego dalka Norway sababo bani'aadnimimo awgood. Waxay sidaan noqon kartaa haddii lagaa daawaynayo cudur ku soo-bood oo loo dhiman karo oo ay khatar tahay in lagaa joojiyo daawaynta. Marka ay sidaan tahay waxaa codsigaaga lagaga baaraandegi karaa dalka Norway ama wareejintaada ayaa dib loo dhigi karaa ilaa inta ay xaaladdaada caafimaad ka soo raynayso.

### **3. MAXAA DHACAYA HADDII UU KIISKAAGU DUBLIN NOQDO?**

Halkan waxaad ka akhrisan kartaa waxa dhacaya laga bilaabo marka aad magangalyo codsato ilaa hay'adda UDI ay ka go'aan gaarayso in codsigaaga lagaga baaraandegayo dalka Norway, ama in lagu wareejin doono dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin:

- Marka aad magangalyo codsato booliiska ayaa baari doona arrimaha ay ka mid yihiin baasaboorkaaga iyo dalkugalkaaga, waxayna baari doonaan haddii faraha lagaa qaaday oo la geliyey nidaamka Eurodac.
- Haddii mas'uuliyiinta dalka Norway ay aaminsan yihiin in dal kale oo Yurub ku yaalla uu mas'uul ka yahay codsigaaga markaa waraysi kaama qaadi doonto hay'adda UDI.
- Hay'adda UDI ayaa la xiriiri doonta dalka kale waxayna mas'uuliyiinta dalkaas ka codsan doontaa in ay la wareegaan masuuliyadda kiiskaaga.
- Qoraal ayaa lagu ogaysiin doonaa haddii hay'adda UDI ay ka codsato dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin in uu la wareego masuuliyadda kiiskaaga.
- Waxaad hay'adda UDI kula xiriiri kartaa qoraal haddii aad hayso warbixin ku saabsan sababta ay u habboon tahay in codsigaaga lagaga baaraandego dalka Norway.
- Haddii dalka kale uu oggolaado mas'uuliyaddaas, halkaas ayaa lagu wareejin doonaa.

### **Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho qaadato**

Qareen ayaa ku ogaysiin doona haddii hay'adda UDI ay go'aan ku gaarto in lagu wareejinayo dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin. Waxaad xaq u leedahay gargaar sharciyeed oo bilaash ah haddii aad rabto in aad go'aanka cabasho ka qaadato. Waa in uu qareenku rafcaanka ugu soo diro hay'adda UDI saddex toddobaad gudahood.

Sida caadiga ah laguuma oggolaan doono in aad sii joogto dalka Norway inta cabashadaada laga baaraandegayo. Xusuusnow in marka cabashada laga baaraandegayo waxa keliya ee la eegayo waa in codsigaaga magangalyada lagaga baaraandegayo dalka Norway iyo in kale – laguma eegi doono sababaha aad magangalyada u codsanayso. Maadaama aanay mas'uuliyiinta Norway kugu celin doonin dalkaaga hooyo, ayaanay qiimayn doonin inaad halkaa khatar kala kulmi doonto iyo in kale. Waxuu waajibkaasi saaran yahay dalka mas'uuliyadda iska leh ee soo hoos gala Xeerka Dublin, haddii uusan dalkaasi sidaan hore u samaynin.


### **Muddada kiis ka baaraandegidda**

Waxay caadi ahaan hay'adda UDI ku qaadataa laba ilaa lix bilood si ay go'aan uga gaarto in kiiskaaga lagaga baaraandegi doono dalka Norway ama in lagu wareejin doono dal kale oo soo hoos gala Xeerka Dublin.

## **4. WAA MAXAY UJEEDDADA XEERKA DUBLIN?**

- Si loo hor joogsado in isla qof keliya uu dhowr dal magangalyo ka codsado kolba mid ama isla mar keliya.
- Si loo sugo xaq uu magangalyo doonku u leeyahay in codsigiisa magangalyada lagaga baaraandego dal Yurub ku yaalla. Waxay taasi dadka magangalyo doonka ah ka ilaalinaysaa in kolba waddan loo diro iyadoon waddamadaas midkoodna xil iska saarin codsiga magangalyada.
- Si qoysaska la isugu hayo meel keliya iyadoo markaas xubnaha qoyska ee isugu dhow (waalidka, carruurta 18 jir ka yar, labada is qaba, mararka qaar dadka wada nool/lammaaneyasha) kiiskooda isla dal keliya lagaga baaraandegayo.

## DALALKA YURUB KU YAALLA EE SOO HOOS GALA XEERKA DUBLIN:



1 Belgium	7 Giriigga	13 Lithuania	19 Bortaqiiska	25 Iswitzerland
2 Bulgaria	8 Ayreland	14 Luksembourg	20 Romania	26 Iswiidhan
3 Denmark	9 Aysland	15 Malta	21 Slovakia	27 Jekiya
4 Estonia	10 Talyaaniga	16 Holand	22 Slovenia	28 Jarmalka
5 Faransiiska	11 Qubrus	17 Norway	23 Isbayn	29 Hungary
6 Finland	12 Latvia	18 Boland	24 Ingiriiska	30 Austeeriya

Buuggan warbixineed waxaa soo diyaariyey Ururka Norway ee loogu tala galay Dadka Magangalyo doonka ah (NOAS). Ururka NOAS waa urur xuquuqda insaanka u dooda oo aanan dawladda u shaqaynin isagoo warbixin iyo kaalmo sharciyeed ugu deeqa dadka magangalyo doonka ah.

## CIIWAANNO

### **BOOLIISKA AJNEBIGA (POLITIETS UTLENDINGSENHET)**

Booliisku waxay diiwaan geliyaan dadka magangelyo doonka ah ee cusub.

Booliisku waxay kaloo waddanka ka saaraan dadka magangelyo doonka ah ee inta codsigooda la diiday aan dalka iskood uga bixin.

**Ciiwanka Boostada:** Postboks 8102 Dep, 0032 Oslo, Norway

**Ciiwaanka soo booqashada:** Christian Krohgs gate 32, 0186 Oslo

Telefoonka: + 47 22 34 24 00, Fakis: + 47 22 34 24 80

E-mail: [pu@politiet.no](mailto:pu@politiet.no)

### **WAAXDA AGAASINKA AJNEBIGA (UDI)**

waa hey'ad dowladeed oo ay shaqoyinkeeda ka mid yihiin ka baaraandegidda codsiyada magangelyo doonka, qoys isu keenidda, fiisayaasha iyo arrimaha qaadashada dhalashada dalka. UDI waxay kaloo mas'uul ka yihiin xeryaha qaxootiga.

**Ciiwanka Boostada:** Postboks 8108 Dep., 0032 Oslo, Norway

**Ciiwaanka soo booqashada:** Hausmannsgt. 21, 0182 Oslo

Telefoonka: + 47 23 35 15 00, Fakis: + 47 23 35 15 01

Website: [www.udi.no](http://www.udi.no), E-mail: [ots@udi.no](mailto:ots@udi.no)

### **URURKA CAALAMIGA AH EE HAAJIRIINTA (IOM)**

Warbixinta caawimaadda dib u noqoshada uu qofku iskiis u dooranayo.

**Ciiwanka Boostada:** Postboks 8927 Youngstorget, 0028 Oslo, Norway

**Ciiwaanka soo booqashada:** Storgata 10a, dabaqa 2aad, 0155 Oslo

Telefoonka: + 47 23 10 53 20, Fakis: + 47 23 10 53 21

E-mail: [osloreturn@iom.int](mailto:osloreturn@iom.int)

Saacadaha shaqada: Maalmaha shaqada: 10:00 – 15:00,

Maalmaha fasaxa: Xiran yihiin

### **GUDDIGA ARRIMAHA AJAANIIBTA (UNE)**

Waa unug maammul oo sidii maxkamad oo kale ah kaas oo ka baaraandega cabashooyinka laga qaato diidmada ay UDI bixiso.

**Ciiwaanka Boostada:** Postboks 8165 Dep., 0034 Oslo, Norway

**Ciiwaanka soo booqashada:** Stenersgt. 1B/C, 0050 Oslo

Telefoonka: + 47 21 08 50 00, Fakis: + 47 21 08 50 01

Website: [www.une.no](http://www.une.no), E-mail: [postmottak@une.no](mailto:postmottak@une.no)

### **LAANQAYRTA CAS EE NORWAY (NORGES RØDE KORS)**

adeegga baafinta, waxay dadka ka caawiyaan sidii ay isu heli lahaayeen xubnaha qoyska ee ku kala dhumay dagaallada, khilaafyada iyo dhibaatooyinka dabiiciga ah.


Laanqaynrta casi ma siinayaan warbixintaada UDI ama hey'ado kale midn. Adeeggu waa bilaash.

**Ciiwaanka Boostada:** Postboks 1 Grønland, 0133 Oslo, Norway

**Ciiwaanka soo booqashada:** Hausmannsgt. 7, 0186 Oslo

Telefoonka: + 47 22 05 40 00

Website: [www.rodekors.no](http://www.rodekors.no), E-mail: [tracing@redcross.no](mailto:tracing@redcross.no)



**Ururka Norway ee loogu tala galay Dadka Magangalyo doonka ah (NOAS)**

Cinwaanka lagu booqdo: Torggata 22, 0183 Oslo, Norway

Cinwaanka boostada: P.O.Box 8893 Youngstorget, NO-0028 Oslo, Norway

Tel.: 22 36 56 60, Fakis: 22 36 56 61

Bogga internetka: [www.noas.org](http://www.noas.org), E-mail: [noas@noas.org](mailto:noas@noas.org)